

Lex Fikrado Kharash Yar oo la xariira Ammaanka Wadooyinka lagu tago Dugsiga Mini Grants

Arjiyada waa in ay soo gaaraan Waaxda Gaadiidka Seattle Abriil 1-30 iyo Oktoobar 1-31

PTSAyada ama Dugsiyada waxay dalban karaan SRTS Mini Grants ee bixiyaa ilaa \$1,000

http://www.seattle.gov/transportation/ped_srts_grant.htm

Waxaan kugu kaalmeyn karnaa in aad dalbatid! La xariir: www.SeattleGreenways.org we advocate for safe healthy streets for all people

1. Crossing Flags

- **Meeqa ayay ku kacdaa?** Callamo iyo baaldiyo ku filan oo kharashka ku celiya ku dhawaad \$250 halkii gees halkii sanno.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Waalidiinta ayaa u baahan in ay kaalmo ka geystaan meesha la dhigo callamada.



2. Bilow Ilaalinta Dugsiga

- **Meeqa ayay ku baxda?** Ilaalada Dugsiga waxay u baahan yahiiin callamo, toobinta ammaanka iyo labbiska ammaanka la siiyo ardayda kaalmeysa ardayda kale in ay nabad uga gudbaan waddooyinka. Diyaarinta adeegga ilaalinta ammaanka waxay ku baxda ku dhawaad \$400.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Waalidiinta ku shaqeyso iskaa wax u qabso ama shaqaalaha dugsiga waxaa looga baahan yahay in ay tababaraan iyo in ay kormeeraan xubnaha ilaalinta ammaanka ardayga.



3. Sur calaadaha Slow for Kids (Aayarka Caruurta) iyo 20 is Plenty (20 waa Badan Tahay)

- **Meeqa ayay ku kacdaa?** Calaadaha waa lacag la'aan, waxaana laga heli karaa Waaxda Gaadiidka Seattle (Seattle Department of Transportation) ama Seattle Neighborhood Greenways.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga waxay calaamadda ku suri karaan hantidooda.



4. Waxaad samaysaa Xisaab Xerka Socodka (Walking Audit) si aad u ogaatid jidadka u baahan kaalmada ugu badan ee laga helo Magaalada.

- **Meeqa ayay ku kacdaa?** Abaabulaha bulshada ayaa kaalmo ka geysan kara horseedidda xisaab xerka. Deeqda Yar waxay maal gelin kartaa habeynta kharashka sida daabacaadda iyo raashinka si leysugu keeno bulshada.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Abaabulaha bulshada ayaa la socda waalidiinta, shaqaalaha dugsiga iyo xubnaha bulshada xaafadda kaddibna qora faalada iyo macluumaadka.



5. Bilow Socodka Baska Dugsiga (Walking School Bus) waxaadna ka bilowdaa xaafadaada.

- **Meeqa ayay ku baxda?** Waxaad iibsan kartaa labbis soo celiya iftiinka iyo calaamadaha. Abaabuleyaasha bulshada waxay kaalmo ka geysan karaan bilaabidda Socodka Basaska Dugsiga. Marmar caruurta waxay helaan dhiirigelin yar sida shukulaato ama frutto si ay socod ku tagaan dugsiga.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Socodka Basaska Dugsiga waa heer sare, hase ahaatee waxay qaataan xoogaa shaqo oo lagu habeeyo meesha caruurta ka timaado. Ku kaalmeey caruurta in ay tagaan dugsiga waqtiga quraacda. Imaashada dugsiga waa muhiim.



6. Samee wareysi kaddibna ogow sida caruurta ku tagaan dugsigaada. Socodka waa caafimaad!

- **Meeqa ayaa ku baxdaa?** Kharashka warqadda keliya.
- **Yaa u baahan in uu kaalmo ka geysto?** Shaqaalaha dugsiga waxay u baahan yahiin in ay bixiyaan ruqsad si loo bixiyo wareysi, si ay ula hadlaan bixiyeyaasha daryeelka marka ay galaan ama ka baxaan dugsiga. Ku fikir in aad adeegsatid Wareysiga Waalidka Ammaanka Wadooyinka Qaranka (National Safe Routes Parent Survey) ee lagu heli karo Ingiriisi <http://bit.ly/2aH7GXd>, Isbanish <http://bit.ly/2avgSg9>, iyo luqado kale <http://bit.ly/2aWr1is>.

Sanduuqa ku dhig 'X'. Haddaad khalad samayso, sanduuqa oo dhan buuxi, ka dibna sax sanduuqa saxda ah.

6. Badiyaa, side buu ilmahaagu ku yimaaddaa dugsiga kuna hoydaa? (Safiiraha hal ka dooro, sanduuqa ku qor X)

Imaatinka dugsiga	Hoyshada
<input type="checkbox"/> Lug	<input type="checkbox"/> Lug
<input type="checkbox"/> Baaskil ku tagaa	<input type="checkbox"/> Baaskil
<input type="checkbox"/> Baska Dugsiga	<input type="checkbox"/> Baska Dugsiga
<input type="checkbox"/> Gaariga Qoyskaa (ilmahaaga oo kaliya)	<input type="checkbox"/> Gaariga Qoyskaa (ilmahaaga oo kaliya)
<input type="checkbox"/> Gaari la isla raaco (ilmaha qoysas kale)	<input type="checkbox"/> Gaari la isla raaco (ilmaha qoysas kale)
<input type="checkbox"/> Gaadidka Dadweynaha (Basaska, Tareen, iwm.)	<input type="checkbox"/> Gaadidka Dadweynaha (Basaska, Tareen, iwm.)
<input type="checkbox"/> Waxyaalo kale (Saxanka shaagagga leh, mooto, iwm.)	<input type="checkbox"/> Waxyaalo kale (Saxanka shaagagga leh, mooto, iwm.)

+ Sanduuqa ku dhig 'X'. Haddaad khalad samayso, sanduuqa oo dhan buuxi, ka dibna dooro sanduuqa saxda ah.

7. Intee in le'egbay ilmahaaga ku qaadataa inuu dugsiga tago/ka soo noqdo? (Safiiraha hal ka dooro, sanduuqa ku qor X)

Xilliga ay ku Qaadato Taalidda Dugsiga	Xilliga ay ku Qaadato soo Hoyshada
<input type="checkbox"/> In ka yar 5 daqiiqo	<input type="checkbox"/> In ka yar 5 daqiiqo
<input type="checkbox"/> 5 – 10 daqiiqo	<input type="checkbox"/> 5 – 10 daqiiqo
<input type="checkbox"/> 11 – 20 daqiiqo	<input type="checkbox"/> 11 – 20 daqiiqo
<input type="checkbox"/> In ka badan 20 daqiiqo	<input type="checkbox"/> In ka badan 20 daqiiqo
<input type="checkbox"/> Ma garanayo/ Ma hubo	<input type="checkbox"/> Ma garanayo/ Ma hubo